# *KU SOO DHAWOW ISKUULKA*

Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaan maamulayaasha iyo macalimiinta




## Hordhac


1. **Waxbarashada qasabka ah**
   - Garaafka qaabka waxbarashada ee Finland
   - Waxbarida lacag la´aanta ah
   - Raashinka lacag la´aanta ah
   - Mas ´uuliyada daryeelaha
   - Mas ´uuliyada ardayga
2. **Sanad dugsiyeedka**
   - Xafladaha
   - Jadwalka
   - Maalmaha iskuulka
3. **Maadooyinka**
   - Finishku yahay luqada labaad
4. **Kaalmada dheeraadka ee waxbarashada**
5. **Waxbarashada qaaska ah**
6. **Sharciyada nadaamka iskuulka**
7. **Qiyaasida**
8. **Shaqaalaha iskuulka**
9. **Daryeelka caafimaadka ee iskuulka**
10. **Ardayga luqada qalaad ee dhigta iskuulka**

## 1. Waxbarashada qasabka ah

Finland dhamaan caruurta ey u buuxsanto todobada sano waxaa qasab ku ah waxbarashada. Sidoo kale waxbarashada qasabka ah waxa ey quseysaa dadka wadanka finland dibada uga soo guura caruurtooda iyo dhalinyaradoodaba. Dudsiga hoose/dhexe waa sagaal sano oo waxbarashada qasabka ah. Kadib ardeyga waxa usuurto gal ah inuu ku darsado galaas tobnaad oo uu ku saa idsanayo waxbarashadiisa. Dhalinyarada ka qalinjabisa dugsiga hoose/dhexe waxa ey waxbarashadooda ka sii wadan karaan dugsiyada sare ama kuwa farsamada.

### Garaafka waxbarashada Finland



### Waxbarshada lacg laanta ah


Waxbarashada iyo buugaagta loo adeegsado waxbarashaduba waa lacag la'aan waxbarashada hoose.

### Cuntada lacg laanta ah

Ardayga waxaa iskuulka lagu siinayaa hal fadhi oo cunto lacag la'aana ah maalinta iskuulka. Waxaa wanaagsan in horayba bilowga la soo sheego nooca cuntada u goonida ah ardayga.

## Masuuliyada daryeelayaasha

Daryeelayaasha ardayga waxaa saaran masuuliyad ah, inuu canugu ka gudbo waxbarashada qasabka ah. Daryeelaha ardayga waa inuu iskuulka u wargeliya maqnaanshaha ardayga. Maqnaanshaha ardayga waa in la weydiistaa ruqsad.



## Masuuliyada ardayga

Ardaygu waxa uu ka qaybgalayaa waxbarashada hoose, waxa uu ka shaqaynayaa shaqoòyinkiisa iskuulka si taxadar leh iyo inuu u dhaqmo si wanaag ku jiro.

## 2. Sanad dugsiyeedka

Sanad dugsiyeedka iskuulku waa inta u dhexeysa 1.8 - 31.7. Waxa uu u qaybsamaa xiliga dayrta iyo xiliga guga. Kan dayrta waxa uu bilaawdaa agoosto waxa uuna ku dhamaadaa fasaxa kirismiska. Xiliga guga waxa uu bilawdaa janaayo waxa uuna ku dhamaadaa fasaxa xagaaga. Sanad dugsiyeedka waxaa kaloo xitaa ku dhex jira fasaxyo kale oo gaagaaban.

### Xafladaha

Iskuulka waxaa lagu qabtaa xaflado kala duwan oo la xariira dhaqanka finishka.

### Jatwalka iskuulka

Jatwalka waxaa ku cad wax uu ardaygu maalinta iskuulka leehyahay. Jatwalka waxaad kala soconkartaa tusaale ahaan maadooyinka uu ardaygu baranayo. Mar mar waxaa jatwalka ku dhici kara isbadalo. Isbadalada noocaan ah waxay noqon karaan tusaale. Dalxiisyo gaaban, xaflado, dhacdooyinka cayaaraha, iyo booqashooyin waxbarasho. Kuwaas xitaa waxay yihiin qayb muhiim u ah dhigashada iskuulka.

### Maalinta iskuulku waxay ka kooban tahay

- Saacadaha xiisadaha
- Bareega waxaa loogu talo galay nashaso, taasoo ardaydu u baxayaan dibada.
- Shaqo guri waa shaqo, uu ardaygu uga soo shaqaynayo guriga iskuulka kadib.
- Waxbaridada waxaa la isticmaalaa habab badan oo shaqo oo kala duwan.

## 3. Maadooyinka

Luqada hooyo iyo suugaanta (finishka), luqdaha qalaad, xisaabta, biologiga, juquraafiga, barashada degaanka, xirfada qarnka iyo arimaha bulshada, taariiqda, kimisteriga, fiisigiska, diinta iyo barashada nolosha

Farshaxanka- iyo maadooyinka xirfadaha: farshaxanka sawirka, farsamada gacanta, jimicsiga, musikga. Xirfada iyo maadooyinka farshaxanku ma aha maadooyin diiniyan ah. Jimicsigu waa qaybka mida korinta caafimaadka. Xiisadaha jimicsiga waxaa loo soo xirtaa dharka ku haboon sportiga.



## Finishku yahay luqada labaad

Ardayga luqada qalaad barida luqada finishka u la jeedada laga leeyahay waa in lagu caawiyo ardayga inuu barto waxyaabaha aqoonta aasaaska ah ee luqada, si uu u awoodo inuu wax uga qabsado waxna ugu barto bulshada luqada finishka dhexdeeda.

## 4. Waxbarashada caawimaada ah

Waxbarashada caawimaada ah waxaa ardayga la siiyaa mirkii loo baahdo waxayna dheeraad ka tahay waxbarashada caadiga ah.

## 5. Waxbarashada qaaska ah

Waxaa suurtogal ah in ardayga lasiiyo waxbarasho qaas ah, hadii ay lama huraan u tahay horumarka waxbarashada ardayga ee dhigashada iskuulka.

## 6. Nadaamka sharciyada iskuulka

Iskuulku waxa uu leeyahay sharciyo nadaam ah, kuwaas oo ah in loo hogaansamo. Kuwaas u la jeedadoodu waa in la xaqiijiya inuu qof walbaa helo degaan wanaagsan oo uu waxku barto. Ardayga jabiya nadaamka sharciyada iskuulka waxaa lagu ciqaabidoonaa siyaabahan

- in ardayga fasalka debada looga saaro
- in ardayga loo geeyo si maamuluhu ula soo hadlo
- in ardayga lagu reebo iskuulka xiligii caadiga ahaa ee iskuulku markuu dhamaado kadib. Marka ardayga iskuulka lagu reebayo waxaa la wargaliyaa daryeelayaashiisa.

## 7. Qiyaasida

Ardayga iyo xanaaneeyihiisaba waxaa loo sheegaa horumarka ardayga oo ah nambaro ama qoraal ah. Horumarka waxbarashada waxaa marka hore lagu qiyaasayaa hab qoraal ah. Dib markii waxbarashadu sii socoto waxaa shahaadada lagu muujinayaa qiyaas ah nambaro ama qiyaasid ah qoraal. Qiyaasida nambarada ah waxaa la isticmalayaa heerka u dhexeeya 4 -10 darajada 5 waxaa loola jeedaa darajo iska-roon darajada 10 waa mid aad u aqoon iyo xirfad badan.

Ardayda Finland debadeeda ka soo guurtay waxay shahaadada dugsiga hoose/dhexe qaadanayaan, markii ay dhameeyaan maadooyinka waxbarashada dugsiga hoose/dhexe oo dhan.

## 8. Shaqaalaha iskuulka

Iskuulka waxaa ka shaqeeya rag iyo dumarba

- Iskuulka waxaa hogaamiya diritoorka ama hogaamiyaha iskuulka
- Waxbarashada waxaa bixiya macalimiinta fasalka sanadada 1-6
- Waxbarashada xitaa waxa bixiya macalimiinta qaaska ah
- Agaasimayaasha waxbarashadu waxay ardayda siiyaan taakulayn la xariirta arimaha waxbarashada iyo arimaha la xiriira doorashada camalada mustaqbalka

Waxaa kaloo iskuulka ka shaqeeyaan dad waaweyn, kuwaas oo aan ka qayb qaadan wax barida: madaxa iskuulka qaaska ah, xisaabiyaha, nadaafiyaha, qofka dhismaha qaabilsan, shaqaalaha daryeelka cuntada iyo kalkaalisada caafimaadka.

## 9. Daryeelka caafimaadka ee iskuulka

Ardayga iyo qoyskiisaba arimahooda caafimaadka waxaa loo daryeelaa marwalba si aaminaad leh. Daryeelayaalka ardeyga waxaa la rajeynayaa iney ka qeyb qaataan baarista caafimaad ee ardeyda. Baarista caafimaadka waxaa lagu xaqiijinayaa xaalada caafimaadka ardeyga.



## 10. Ardeyga luqada qalaad ee dhigta iskuulka

Macalinku waxa uu u baahan yahay aqbaar ku saabsan waxbarashadaadii hore. Tusaalle ahaan waa muhiim in laga hadlo dhibaatooyinka la xiriira luqada, si ardeygu u helo caawinaada uu ubaahan yahay. Daryeelayaasha waxaa u wanaagsan iney isbartaa ardeyga macalinkiisa. Lakulanka macalinka waxaa suurtogal ah inaad la imaan karto turjubaan.

Maalmaha iskuulka ardeygu wax uu wataa buug loogu talo galay in laysugu gudbiyo aqbaaraadka, kaa soo macalinka iyo daryeeluhuba ay hadii loo baahdo isugu soo gudbinkaraan wixii fariimo ah ee quseeya ardeyga.